

# 2026 Hordhaca cashuur saaritaanka iyo miisaaniyada.



Golaha Magaalada Bloomington waxay qaban doonaan dhageysi dadweyne maalinta Isniinta, Diseembar 8 saacada 6:30 p.m., si ay u ururiyaan fikrado ku saabsan soo jeedinta Magaalada ee cashuur saaritaanka iyo miisaaniyada 2026. Dhageysiga waxaa lagu qaban doonaan Rugaha Golaha Magaalada ee Bloomington Civic Road. Si aad u hesho faahfaahin ku saabsan sida looga qaybgalo, soo booqo blm.mn/cc-1208 ama soo wac 952-563-8790.

Sebtembar 8, Golaha Magaaladu wuxuu dejiyyay cashuurta hantida oo hordhaca ah ee 2026 inay ahaato \$96.2 milyan, oo ah kor u kac 9.44% cashurta 2025. Lacagan kuma jiraan canshuuraha Maamulka Dekedaha ee gaarka ah iyo cashuuraha HRA.

## Oraahda Howlgalkeena

## BLOOMINGTON. tomorrow. together.

Hadafkeenu waa inaan kobcino bulsho adkaysi leh oo wanaagsan oo dadku jeclystaan inay ka mid ahaadaan.

Miisaaniyada la soo jeediyay ee 2026 waxay la jaan qaadaysaa hadafka iyo qorshaha wxyaabaha la siinayo mudnaanta ee qorshaha istaraatijiyyada ee bulshada ku salaysan.



Bulsho isku  
xiran, oo soo  
dhawayn leh



Bulsho  
caafimaad  
qabta



Bulsho leh koboc  
dhaqaale oo loo  
simanyahay

## Maalgashiga Waxyaabaha Mudnaanteena ah



### Ku soo darida Miisaaniyad Ku Salaysan Waxyaabaha la siinayo Mudnaanta

Iyada oo qayb ka ah habka geeddi socodka miisaaniyada 2026, Bloomington waxa ay ku soo daraysaa Miisaaniyad ku saleysan waxayaabaha la siinayo Mudnaanta (PBB) si ay gacan uga geysato isku xirkha kheyraadka iyo waxyaabaha mudnaanta u leh bulshada.

PBB waxay bixinaysaa hab kale oo:

- Dib u eegista barnaamijyada iyo adeegyada Magaalada iyadoo lagu salaynayo qiimaha ay bixiyaan.
- Isku beegitaanka khayraadka iyo qorshaha istaraatijiyyadeed ee bulshada ku salaysan, Bloomington. Berri. Wadajir.
- In la kordhiyo daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka.
- In la isticmaalo xogta si ay u caawiso hagida go'aamada.

PBB waxa ay ku soo kordhinaysaa geedi socodka miisaaniyada caadiga ah ee Magaalada inay bixiso sawir cad oo ah halka ay khayraadku ku socdaan iyo taageerida in laga wada hadlo waxyaabaha la siinayo mudnaanta.

## Qorshaha muddada dheer ee Waaxda Dab demiska

In ka badan kala bar, 53%, ee miisaaniyad kordhinta la soo jeediyay waxaa loo qoondeeyey booliiska iyo howlgallada dab damiska. Iyada oo ay sii korodhay Bloomington oo ay sii weynaatay baahida loo qabo badbaadada dadweynuhu, Waaxda Dab demiska waxa ay u gudbaysaa qaab shaqaale waqtii buuxa iyo waqtii-dhiman ah si loo hubiyo in loo hayo wax ka qabashada xaaladaha degdega ah oo bulshada oo dhan ah oo la isku halayn karo.

### Hadafka mustaqbalka fog

- Shaqaale gelinta lix saldhiga dab damiska ah inay yeeshaan afar dab demiye, oo uu ku jiro gargaare caafimaad (paramedic), si markaa qaybta koowaad ay ku goobta gurmadka ku yimaadaan 7 daqiqi, 30 ilbiriis ugu yaraan 90% markasta.
- In laga kordhiyo 46 oo la gaarsiiyo 78 dab demiyeyaasha waqtii buuxa shaqeeyaa, oo lagu daro 75 dab demiye oo wakhti-dhiman shaqeeyaa, oo ay la socdaan shaqaalaha ka hortaggaa iyo talisku.
- Cusbooneysiin lagu sameeyo dhammaan lixda saldhigaya dab demiska si loo taageero shaqaale wakhti buuxa ah. Laba waa la dhammaystiray; inta soo hartayna waxaa loo qorsheeyay in la cusboonaysiyo ilaa 2033.



Ilaa aan gaarno hadafkeena, canshuuraha sannad walba ah, oo uu ku jiro 2026, ayaa waxaa ku jiri doontaa maalgelin loogu talagalay shaqaalaha dab demiska iyo dayactirka cusboonaysiinta xarumaha dab demiska. Maalgelintani waxay caawisaa hubinta in dadka degan Bloomington ay sii wataan helitaanka jawaab-celinta xaaladaha degdega ah ee wakhtiga ku habboon marka loo baahdo.

El consejo municipal de la cuidad de Bloomington convocará una audiencia pública para escuchar de usted sobre la propuesta de recaudación de impuestos y el presupuesto de la ciudad para el año 2026, el día lunes, 8 de diciembre a las 6:30 p.m. Para más información en español, por favor visite la página de la red del internet blm.mn/property-tax

Dawlada Hoose ee Bloomington waxay qaban doontaa kulan lagu dhegeysanayo dadwaynah Isniinta, Diisambar 8 markay tahay saacada 6:30 fiidnimo si lagaaga dhegysto adiga arrinta ku saabsan cashuur saarida iyo miisaaniyada Magaalada 2026 ee la soo jeediyay. Wixii macluu- maad dheeraad ah ee ku qoran Af Soomaali, fadlan booqo blm.mn/property-tax

Hội Đồng Thành Phố Bloomington sẽ tổ chức một buổi điều trần công cộng vào thứ Hai, ngày 8 tháng Mười hai, lúc 6:30 giờ tối để nghe ý kiến của quý vị về đề xuất ngân sách và vấn đề đánh thuế năm 2026 của Thành Phố. Để tìm hiểu thêm bằng tiếng Việt, vui lòng truy cập trang mạng blm.mn/property-tax